

FAAFIN DEGDEG AH

Sibteembar 20, 2023

La xiriir:

Perry Cooper | Sarkaalka Sare ee Warbaahinta Dekedda Seattle
(206) 787-4923 | cooper.p@portseattle.org

Iskaashatadu waxay Bilaabeen Ol-olaha Codsiga Muwaadinimada

Dekada Seattle iyo OneAmerica, oo ah urur khayri ah oo xuquuqda u dooda kuwaasoo u taagan dhisida awooda bulshooyinka soo galootiga iyo qaxootiga ah, ayaa bilaabay ol-ole bishaan si loogu dhiiri geliyo shaqsiyaadka u qalma inay codsadaan muwaadinimada Mareykanka. Ol-olaha waxaa ku jira fariimaha baraha bulshada iyo muuqaalka ah si loogu dhiiri geliyo shaqsiyaadka u qalma inay iskudayaan ka faa'iideysiga faa'iidooyinka iyo masuuliyadaha ay wadato muwaadinimada Mareykanku.

Dadka xiiseynaaya codsashada muwaadinimada ayaa heli kara **caawimaad bilaash ah oo ku aadan codsiga ayna ka helayaan qareennada, kaaliyaasha sharciga, iyo turjumaano mutadawiciin ah inta lagu jiro munaasabada maalinta dhan soconaysa ee Maalinta Mudwaanimada oo dhacaysa Sabtida, Sibteembar 30 kana dhacaysa Machadka Farsamada ee Renton**. Dadka daganaanshaha rasmiga ee sharciga ah haysta ee u qalma (dadka haysta kaarka cagaaran) ayaa lagu soo dhawaynayaa inay ka qaybgalaan.

"Shaqaalahaheenu waa mid kamid ah shaqaalaha iskugu dhafid badan, oo ka kala yimid waaxaha kaladuwan sida shaqaalaha bada, kuwa diyaaradaha, iyo kuwo kale. Waxaan si joogto ah ula xiriirnaa malaayiin booqdeyaal ah sanad kasta anagoo adeegsanayna xiriiradeena caamiga ah," **ayay tiri Gudoomiyaha Dekada Hamdi Mohamed**, "Sharaf ayay noo tahay inaan adeegsano baraaheena ugu fiican si aan uga waramo faa'iidooyinka iyo masuuliyadaha muwaadinimadu saarayso dadka soo galootiga ah, qaxootiyaasha, iyo booqdeyaasha shisheeye ee u qalma,"

"OneAmerica ayaa la shaqeynaysay Dekada ilaa sanadkii 2017 si loo xaqiijiyo in bulshooyinkeena soo galootiga iyo qaxootiga lasoo dhaweeyo laguna casuumo inay arkaan fursadaha dhaqaalaha ee ka jira ganacsiyada Dekada la xiriira," **ayuu yiri Rosanna Donoso Barredo, Maamulaha Sare ee Washington New Americans**. "Waxaan dooneynaa in dadku ogaadaan faa'iidooyinka codsashada muwaadinimada iyo inay jiraan khayraad bilaash ah oo caawinaaya inta ay hawsha ku jiraan."

Iskaashiga u dhexeeya OneAmerica iyo Dekada ayaa biloowday si looga jawaabo mamnuucida safarada ee Maamulka Trump uu sameeyay. Mamnuucida ayaa saamaysay soo gelida Mareykanka ee muwaadiniinta lix (oo markii hore ahaa todobo) wadan oo ku yaala Bariga Dhexe taasoo saamaysay qaxootiyaasha iyo soogalootiga. Si looga jawaabo, Gegiga Dekada Seattle ayaa ansixiyay qaraarka Dekad Soo Dhawayn leh, kaasoo u astaynaaya Gegiga Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA) goob badqab iyo soo dhawayn u leh dhammaan booqashooyinka difaacaayana xuquuqda iyo tayada nololaha ee dadka soo galootiga ah, qaxootiyaasha, iyo martida shisheeye.

Ol-olaha Qaraarkaas ka dhashay ee Muwaadinimada ayaa sii wada inuu ka shaqeeyo isla higsiyada wadaaga ah iyo xogta iyo khayraadka ku saabsan tubta helista muwaadinimada si looga caawiyo dadka u qalma ee sifo rasmi ah oo sharci ah wadanka ku dagan inay helaan difaacyada, xuquuqda, iyo faa'iidooyinka muwaadinimadu bixiso.

Dekada Seattle ayaa aqoonsan in shaqooyinkeeda ay suuragasheen soo galootiga iyo booqdeyaasha shisheeye. Gegiga SEA iyo taarminaallada maraakiibtau waxay soo dhawaynayaan musaafiriinta caalamiga ah ee booqanaaya Waqooyi-Koonfureed Baasifiga. Sida ku cad xogta tirakoobka, laga bilaabo 2021, hal kamid ah afar, ama 24 boqolkiiba dadka deegaanka ee Degmada King waa dad wadamo shisheeye u dhashay. Ganacsiga caalamiga ah ayaa lagu kobciyaa iskaashiyo iyo shaqaale ka kala yimid caalamka oo dhan. Kumanaan soo galooti ah ayaa ka shaqeeya Dekada ama shirkadaha gudaha ama aagaga xarumaheena.

Waxaad u qalmi kartaa inaad codsato muwaadinimo haddii aad buuxiso shuruudaha soo socda:

- 18 sano ama ka wayn
- Haysta kaarka daganaanshaha ugu yaraan shan sano (ama sadex haddii aad qabto muwaadin Mareykan ah)
- Aad si xiriir ah u daganayd Mareykanka ugu yaraan shan sano
- Aad awoodo inaad akhrido, qorto, aadna ku hadasho Ingiriiska aasaasiga ah (shardi dhaafyo ayaa jira)
- Aad fahamayso taariikhda iyo dawlada Mareykanka

Sanadkii 2022, OneAmerica ayaa caawisay in ka badan 280 dad ah intii lagu jiray munaasabadaha Maalinta Muwaadinimada ee la baxsho sanadka oo dhan. Albaabada rugta ayaa furan laga bilaabo 9:00 a.m.; dadka waxaa lagu dhiiri gelinayaa inay yimaadaan xili hore waayo waxaa lagu baxshaa sida loosoo kala hormaro. Dadka ka qaybgalaaya waa inay keenaan dhammaan dukumiintiyada laga rabo, ayna ku jiraan kaarkooda daganaanshaha rasmiga ah. Halkaan ka eeg liiska dukumiintiyada la iska rabo> <https://wanewamericans.org/your-roadmap-to-citizenship/gather-required-documents/>

Hel xog dheeri ah oo ku aadan aqoon kororsiga iyo sida loogu diyaar garoobo>

<https://wanewamericans.org/attend-a-citizenship-day/>

Waa jira labo maalmood oo kale uu xarumaha Maalinta Muwaadinimada ah oo ka dhacaaya gobalka Washington oo si taxane ah u dhacaaya Sibteembar 30:

- Pasco, Washington kana dhacaaya Columbia Basin College
- Sunnyside, Washington kana dhacaysa Nuestra Casa

Marka laga soo tago rugta Maalinta Muwaadinimada, marka lagu safraayo Gegiga SEA, waxaad helaysaa wargelinta cusub ee adeegga dadwaynaha oo ay duubeen Gudoomiyaasha Dekadu kana baxaaya shaashadaha muuqaalka ee SEA, kaasoo ah muuqaal cod wata, sawir casri ah oo sheegaaya xog iyo khayraad ku saabsan codsashada muwaadinimada. Daawadeyaasha xiiseynaaya waxaa lagu duwi doonaa websedka O-olaha New Americans halkaas oo ay ka aqoonsan karaan adeegyada maxaliga ah iyo taageerada ka caawinaysa dhammaan hawsha qaadashada muwaadinimada.

Xog badan ka ogoow codsashada muwaadinimada Mareykanka> newAmericanscampaign.org

###